

Cudurka ka dillaacay Bergen: Tillaabooyin adag oo lagu soo rogay Bergen iyo degmooyinka ku xeeran

Bergen iyo degmooyinka ku xeeran waxaa ka dillaacay fayraska koroonaha nooca Ingiriiska ka yimid iyo nooca Koonfur Afrika ka yimid. Sidaas darteed ayay dawladda uga codsadeen in ay soo rogto tillaabooyin kuwii hore ka adag oo looga hortagayo kala qaadista cudurka.

Tillaabooyinka kuwii hore ka adag waxay soconayaan laga billaabo 7-da febraayo 2021 saacaddu markay tahay 18.00 ilaa iyo 14-ka febraayo. Sababta tillaabooyinka loo soo rogayo ayaa ah si ay degmooyinku u helaan fursad ay ku ogaadaan xaaladda cudurka.

– Degmooyinka uu ka dillaacay fayraska noociisa aadka loo kala qaadi og yahay waa in lagu soo roga tillaabooyin ka adag dalka intiisa kale. Weli hadafku waa in aan joojinno ama hakinno faafidda noocyadaan aadka loo kala qaadi og yahay. Degmooyinka Nordre Follo ee fayrasku ka dillaacay taas way ku guuleysteen, Bergen iyo degmooyinka ku xeeranna in ay ku guuleysan doonaan ayaan aaminsanahay, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka-iyo daryeelka.

Dawladda ayaa go'aamin karta tillaabooyinka lagu soo rogayo degmo iyo degmooyinka ku xeeran marka ay taasi lagama maarmaanka u tahay in si degdeg ah oo isu duwan loo hirgeliyo tillaabooyin looga hortagayo faafidda kala qaadista cudurka.

"Degmooyinka wareegga 1-aad " waa degmooyinka uu cudurku ka dillaacay iyo degmooyinka dillaaca xiriirka la leh ama kuwa xiriir badan la leh degmooyinka uu ka dillaacay.

"Degmooyinka wareegga 2-aad" waa degmooyinka ku xeeran "degmooyinka wareegga 1-aad", oo ayaga laftigoodu dillaaca cudurka dartiis u baahan in ay si degdeg ah tillaabooyin u qaadaan.

Wareegga 1-aad iyo wareegga 2-aad waa keliya magacyo joqraafi ah. Heerka tillaabooyinka lagu soo rogayo wareegga 1-aad iyo wareegga 2-aad waxay ku xiran tahay hadba inta ay le'eg tahay khatarta cudurka dillaacay.

Wareegga 1-aad waa: Bergen, Kvam iyo Ulvik

Wareegga 2-aad waa: Alver, Askøy, Bjørnafjorden, Eidfjord, Osterøy, Samnanger, Ullensvang, Vaksdal, Voss iyo Øygarden.

Wareegga 1-aad waxaa lagu soo rogayaa tillaabooyinka heerka A (ee ku qoran [cutubka 5A ee xeer-hoosaadka covid-19](#)). Waxaana lagu kordhinayaa talooyin.

Wareegga 2-aad waxaa lagu soo rogayaa tillaabooyinka heerka B (ee ku qoran [cutubka 5B ee xeer-hoosaadka covid-19](#)). Waxaana lagu kordhinayaa talooyin.

Waa maxay wareegga 1-aad midka 2-aad? Halkaan ka akhriso warbixinta [heerka tillaabooyinka degmooyinka wareegga 1-aad iyo degmooyinka wareegga 2-aad](#).

Wareegga 1-aad waxaa khuseeya tillaabooyinka soo socda laga billaabo 7-da febraayo ilaa iyo 14-ka febraayo:

Waa degmooyinka: Bergen, Kvam iyo Ulvik

Xannaanooyinka carruuraha, dugsiyada, jaamacadaha, machadyada iyo dugsiyada farsamada

Xannaanooyinka carruuraha iyo dugsiyada hoose/dhexe waxaa laga dhigayaa heerka guduudan ee waafaqsan nidaamka dalka ee heerarka cagaarka, jaallaha iyo guduudka [trafikklysmodellen].

Mas'uuliyiinka ka hortagga kala qaadista cudurrada ee degmada ayaa go'aamin kara in la xiro dugsiyada iyo xannaanooyinka carruuraha haddii ay taasi lagama maarmaan u tahay si loogu diyaargarooobo in la galo heerka guduudan ama haddii ay xaaladda kala qaadista cudurku taas keenayso.

Dugsiyada sare waxaa lagu soo rogayaa in ay waxbarashadu ku baxdo hab dhigitaal ah, sida ugu dhakhsaha badan ee ay xaaladda kala qaadista cudurku taas u khasabto ayaana loogu diyaargaroobayaa in la galo heerka guduudan.

Ardayda oo dhan waa laga xirayaa dhammaan golayaasha jaamacadaha, machadyada, dugsiyada farsamada. Shaqaaluhu waxay raacayaan xeerarka shaqada- iyo shaqaalaha.

Qabanqaabooyinka

Waa la mamnuucayaa dhammaan qabanqaabooyinka ka dhaca guriga dibaddiisa, gudaha iyo dibedda labada – marka laga reebo aaska.

Waa la oggol yahay qabanqaabooyinka sida dhigitaalka ah u dhacaya haddii dadka jooga aysan ka badnayn shan qof oo aysan ku jirin shaqaalaha hawl wadeennada ka ah qabanqaabada.

Isboortiga- iyo firfircoonida wakhtiga firaaqada la yahay

Lama oggola isboortiga abaabulan ee dadka waaweyn iyo carruurta midna. Waxaan sidoo kale la oggolayn firfircoonida wakhtiga firaaqada la yahay sida tababbarka, kooxaha heesaha, kuwa muustikada iyo tiyaatarka.

Goobaha shaqada

Cid kasta oo awoodda waxaa lagu amrayaa in ay guriga ku shaqayso. Waxaa shaqabixiyayaasha looga baahan yahay in ay shaqaalaha u suurageliyaan in ay guriga ku shaqeeyaan ilaa iyo inta ay taasi suurtaggalka tahay. Shaqa-bixiyayaashu waa in ay caddayn karaan in shaqaalaha loo sheegay sida arrintaas loo fulin karo.

Dukaammada

Dhammaan dukaammada iyo dukaammada waaweyn [varehus] waa la xirayaa, marka laga reebo kuwa soo socda:

- Dukaammada cuntada oo ay ku jiraan dabakaayooyinka, dukaammada gada waxyaalaha caafimaadka u roon iyo kuwa kale ee ay badeecadoodu cuntada u badan tahay.
- Meelaha lagu gado cuntada xayawaanka iyo qalabka kale ee lagama maarmaanka u ah xayawaanka rabbaayadda ah iyo xoolaha la dhaqdo.
- Farmashiye

- Kuwa iibiya faashadaha iyo wixii la hal maala
- Dukaammada muraayadaha indhaha
- Dukammada maanabooliyada khamriga [Vinmonopolet]
- Kaalimaha shidaalka
- Meheradaha gada waxsoosaarka beeraha iyo xayawaanka
- Ganacsatada jumlada- iyo bakhaaradda wax ka iibiya meheradaha farsamada gacanta iyo wixii la mid ah.

Dukaammada iyo dukaammada waaweyn way u furnaan karaan in laga qaato badeeco horay looga sii dalbaday, marka ay qaadashadu u dhici karto si macquul ah oo laga hortagayo kala qaadista cudurka.

Makhaayadaha, biibitooyinka, baararka iyo hoteellada

Makhaayadaha waa la xirayaa, laakiin waa la oggol yahay cuntada la qaadanayo.

Lama oggola in baararka khamri lagu iibiyo.

Makhaayadaha hoteelladu cunto waa siin karaan dadka hoteelka jiifa.

Meheradaha iyo goobaha soo socda waa in ay xirnaadaan

- Goobaha jimicsiga
- Goobaha cibaadada, marka laga reebo aaska
- Maktabadaha
- Jirdiinooyinka dalxiiska [Fornøysesparker], hoolasha biingaha, hoolasha khamaarka, goobaha ciyaaraha ee carruurta, hoolasha bowlinka iyo meelaha la midka ah ee firfircoonida wakhtiga firaaqada la yahay- iyo madaddaallada loo tago.
- Hoolasha dabbaasha, goobaha dabbaasha iyo biyaha lagu ciyaaro, goobaha jirduugista biyaha la isticmaalayo, hoolasha dabbaasha ee hoteellada iyo wixii la mid ah.
- Madxafyada
- Shaleemooyinka, tiyaatarrada, goobaha ruwaayadaha iyo meelaha la midka ah ee dhaqanka iyo madaddaallada.

- Goobaha dadweynaha ee kale iyo meheradaha lagu qabto dhaqan-, madaddaalo- ama firfircoonida wakhtiga firaaqada la yahay ee ay dadku meel gudaha ah isugu yimaadaan.

Waxyaal lagu talinayo

Waa in dhammaan laga fogaadaa in guriga laysku soo booqdo ama laysugu yimaado. Marka laga reebo adeegyada lagama maarmaanka ah ee qofka guriga lagu siinayo ama booqashada qof sakaraad ah.

Dadka keligood deggan waxaa soo booqan kara ama ay booqan karaan hal ama labo saaxiib oo joogto ah ama hal guri oo joogto ah.

Carruurta dhigata xannaanada carruurta iyo dugsiyada hoose waxaa soo booqan kara kuwa ay isku kooxda joogtada ah yihiin [kohort].

Dhammaan waa in aan la aadin safarrada aan lagama maarmaanka ahayn.

Lama oranayo yaan la aadin cariish [hytte] ku yaalla meel degmadaada ka baxsan. Laakiin is raaca keliya dadka aad isla deggan tihiin oo yaanan la idin soo booqannin. Adeegga aad u baahan tahay oo dhan intaadan bixin ka gado degmadaada. Ha tegin dukaammada, makhaayadaha ama meelaha ay dadka badan isugu yimaadaan ee degmada uu cariishku ku yaallo.

Masaafu fiican u jirso dadka kale ee shiiga ciyaaraya ama lugaynaya. Iska hubi talooyinka iyo xeerarka ka jira degmada uu cariishku ku yaallo, oo u hoggaansan kuwaas.

Meelaha shiiga lagu ciyaaro way furnaan karaan. Laakiin waa in ay hubiyaan in ay dadku mar kasta isu jirsan karaan masaafu 1 mitir ah. Waa in laga hortagaa in ay dadku hoosta iska galaan meelaha ay taasi badanaaba ka dhacdo sida safka wiishka shiiga, irridaha laga galo, soodhoweynta, musqulaha iyo makhaayadaha.

Waa in ay suurtaggal tahay in gacmaha layska nadiifin karo, waana in meesha marar badan si fiican loo nadiifiyaa. Si loo fududeeyo hawlaha raadraaca kala qaadista cudurka ee mas'uuliyiinta caafimaadka meelaha ay taasi suurtaggalka u tahay waa in ay sameeyaan nidaam lagu diiwaangelinayo dadka meesha jooga.

Biibitooyinka iyo meelaha kale ee lagu nasto ee goobta uma furnaan karaan in cunto gudaha lagu cuno, laakiin daaqad ama meel la mid ah ayaa cuntada laga qaadan karaa – waana in cuntadaas bannaanka lagu cunaa.

Degmooyinka iyo gobolladu waa in ay gaadiidka dadweynaha ku soo rogaan tillaabooyin kuwii hore ka adag. Sida tusaale ahaan in boqolkiiba 50 keliya laga isticmaalo inta uu gaadiidku qaado.

Meheradaha qof-qof laysu hor fadhiisto sida timajaraha waa in ay soo rogaan tillaabooyin kuwii hore ka adag sida in ay gafuur-xir gashadaan mararka aysan suurtaggalka ahayn in laysu jirsado masafo hal mitir dhan ama shaqada la yareeyo ama si ku meelgaar ah loo joojiyo hawlaha u baahan in ay labada qof wejiyadoodu isu dhowaadaa.

Degmooyinka iyo dadweynaha degmooyinka ay arrintaan khuseyso waxaa lagula talinayaa in ay ka fikiraan in ay dadka baaraan maalmaha 7aad-10aad ee muddada uu qofku karantiilka ku jiro. Waxaa ayadana sidoo kale loo baahan yahay in laga fikiro in ay karantiil galaan dadka ay isla deggen yihiin dad u dhowaaday kuwo cudurka laga helay oo karantiil ku jira, haddii uu jiro shaki ah in ay dadkaasi qaadeen fayraska noociisa cusub

Dadka khatarta weyn ugu jira in ay aad ugu xanuunsadaan ama u dhintaan haddii uu cudurku ku dhaco, waa in ay taxaddaraan.

Waajibka in gafuur-xir la isticmaalo

Waa in gafuur-xir la isticmaalaa marka aysan suurtaggal ahayn in ugu yaraan hal mitir laysu jirsado, haddii aysan ahayn qof aydnaan isla degganayn oo aad si kooban meel isugu dhaafaysaan

Gafuur-xir ayaa la isticmaalayaa marka la joogo goobaha dadweynaha sida dukaammada, gaadiidka dadweynaha- iyo boosteejooyinka gudaha ah, makhaayadaha marka cunto laga qaadanayo, aagagga la wadaago ee suuqyada haddii ay u furan yihiin farmashiye iyo dukaan cunto oo ku dhex yaalla dartood – iyo goobaha cibaadada marka uu aas jiro.

Waajibka isticmaalka gafuur-xirku sidaa si la mid ah ayuu u qabanayaa shaqaalaha ka shaqeeya meel aysan suurtaggal ahayn in ugu yaraan hal mitir loo jirsado qofka kuu yimid. Laakiin taasi ma khusayso goobaha laga hirgeliyay tillaabooyinka kale ee looga hortagayo in cudurka la kala qaado sida in wejiga oo dhan la dabooшо ama derbi idiin dhexeeyo iyo wax la mid ah.

Rakaabku waa in ay gafuur-xir isticmaalaan marka ay taksi raacayaan. Rakaabku wuxuu gafuur-xirka xiranayaa ka hor inta uusan taksiga gelin, iskamana furayo ilaa iyo inta taksigu ka istaagayo oo uu ka degayo. Waajibka isticmaalka gafuur-xirku si taas la mid ah ayuu darawalka taksiga u saaran yahay marka uu rakaab taksiga saaran yahay.

Carruurta ka yar 12 sano iyo dadka aan gafuur-xir isticmaali karin sababo caafimaad ama sababo kale awgood waajib kuma aha in ay gafuur-xir xirtaan

Degmo kasta waa soo rogi kartaa talooyin iyo xeerar adag oo ku salaysan xaaladda kala qaadista cudurka ee degmadaas. Waxaa sidaas darteed muhiim ah in uu qofku la socdo xeerarka degmadiisa ku yaalla.

Wareegga 2-aad waxaa khuseeya tillaabooyinka soo socda laga billaabo 7-da febraayo ilaa iyo 14-ka febraayo:

Waa degmooyinka: Alver, Askøy, Bjørnafjorden, Eidfjord, Osterøy, Samnanger, Ullensvang, Vaksdal, Voss iyo Øygarden.

Xannaanooyinka carruuraha, dugsiyada, jaamacadaha, machadyada iyo dugsiyada farsamada

Xannaanooyinka carruuraha iyo dugsiyada hoose/dhexe waxaa laga dhigayaa heerka jaallaha ee waafaqsan nidaamka dalka ee heerarka cagaarka, jaallaha iyo guduudka.

Dugsiyada sare waxaa laga dhigayaa heerka guduudan ee waafaqsan nidaamka dalka ee heerarka cagaarka, jaallaha iyo guduudka. Jaamacadaha, machadyada, dugsiyada farsamada: Dhammaan waxbarashada iyo qabanqaabooyinka sii qorshaysnaa dib baa loo dhigayaa ama dhigitaal ayaa loo beddelayaa.

Ardayda oo dhan waa laga xirayaa golayaasha jaamacadaha, machadyada, dugsiyada farsamada. Shaqaaluhu waxay raacayaan xeerarka shaqada- iyo shaqaalaha.

Qabanqaabooyinka

Xeerarka iyo talooyinka dalka ayaa la raacayaa.

Isboortiga- iyo firfircoonida wakhtiga firaaqada la yahay

Loma oggola firfircooni isboorti oo abaabulan oo loogu tala galay dadka waaweyn. Dad

waaweyn waxaa laga wadaa 20 jir iyo wixii ka weyn. Waxaa isla sidaas ah firfircooninada wakhtiga firaqada la yahay sida tababbarka iyo tababarashada kooxaha heesaha iyo muusigga iyo tiyaatarka.

Goobaha shaqada

Cid kasta oo awoodda waxaa lagu amrayaa in ay guriga ku shaqayso. Waxaa shaqabixiyayaasha looga baahan yahay in ay shaqaalaha u suurageliyaan in ay guriga ku shaqeeyaan ilaa iyo inta ay taasi suurtaggalka tahay. Shaqa-bixiyayaashu waa in ay caddayn karaan in shaqaalaha loo sheegay sida arrintaas loo fulin karo.

Dukaammada

Dhammaan dukaammada iyo dukaammada waaweyn waa la xirayaa, marka laga reebo kuwa soo socda:

- Dukaammada cuntada oo ay ku jiraan dabakaayooyinka, dukaammada gada waxyaalaha caafimaadka u roon iyo kuwa kale ee ay badeecadoodu cuntada u badan tahay.
- Meelaha lagu gado cuntada xayawaanka iyo qalabka kale ee lagama maarmaanka u ah xayawaanka rabbaayadda ah iyo xoolaha la dhaqdo.
- Farmashiye
- Kuwa iibiya faashadaha iyo wixii la hal maala
- Dukaammada muraayadaha indhaha
- Dukammada maanabooliyada khamriga [Vinmonopolet]
- Makhaayadaha
- Meherada ay ka midka yihiin timajarayaasha, jir-xannaaneeyayaasha, kuwa maqaarka sawirrada ku xardha iwm.
- Meheradaha caafimaadka sida jir-duugayaasha, dhabar-duugayaasha, caga-duugayaasha iyo qaar kale
- Kaalimaha shidaalka
- Meheradaha gada waxsoosaarka beeraha iyo xayawaanka

- Ganacsatada jumlada- iyo bakhaaradda wax ka iibiya meheradaha farsamada gacanta iyo wixii la mid ah

Dukaammada iyo dukaammada waaweyn way u furnaan karaan in laga qaato badeeco horay looga sii dalbaday, marka ay qaadashadu u dhici karto si macquul ah oo laga hortagayo kala qaadista cudurka.

Makhaayadaha, biibitooyinka, baararka iyo hoteellada

Makhaayaduhu waa furnaan karaan.

Lama oggola in baararka khamri lagu iibiyo.

Meheradaha iyo goobaha soo socda waa in ay xirnaadaan

- Goobaha jimicsiga
- Jirdiinooyinka dalxiiska [Fornøysesparker], hoolasha biingaha, hoolasha khamaarka, goobaha ciyaaraha ee carruurta, hoolasha bowlinka iyo meelaha la midka ah ee firfircoonida wakhtiga firaqada la yahay- iyo madaddaallada loo tago.
- Madxafyada
- Shaleemooyinka, tiyaatarrada, goobaha ruwaayadaha iyo meelaha la midka ah ee dhaqanka iyo madaddaallada.
- Goobaha dadweynaha ee kale iyo meheradaha lagu qabto dhaqan-, madaddaalo- ama firfircoonida wakhtiga firaqada la yahay ee ay dadku meel gudaha ah isugu yimaadaan – marka laga reebo meelaha firfircoonida noocaas ah ku qabsadaan carruurta- iyo dhallinyarada ka yar 20-ka sano.
- Hoolasha dabbaasha, goobaha dabbaasha iyo biyaha lagu ciyaaro, goobaha jirduugista biyaha la isticmaalayo, hoolasha dabbaasha ee hoteellada iyo wixii la mid ah waa la xirayaa, laakiin waxaa loo furayaa dabbaasha dugsiyada ee dadka ka yar 20 sano, iyo tababbar dabbaal oo loogu tala galay carruurta dugsiyada hoose iyo wixii ka yar - iyo tababbarashada ciyaartoyda xirfadlayaasha ah. Waxaa iyagana la oggol yahay baxnaaninta iyo tababbarka lagu soo kabsanayo ee qof gaar loogu fidinayo ama koox yar oo dad ah loo fidinayo iyada oo uu la joogo qabanqaabiyihii hawlahaas. Waxaa ayana la oggol yahay daaweynta qofka gaarka ah loo fidinayo ee ballanta loo qabsado, halkaas oo ay biyuhu daaweynta qayb ka yihiin.

Waxyaalo lagu talinayo

Waa in dhammaan la xaddidaa xiriirka bulshada.

Waxaa dadka lagu boorinayaa in bannaanka lagu kulmo, oo aysan qofka soo booqan wax ka badan 5 qof oo aysan ku jirin dadka ay qofka isla deggan yihiin. Haddii ay martidu kulligood isku guri ka yimaadeen, intaas waa laga badnaan karaa – laakiin waa in ay dadku ahaadaan kuwo kala fogaan kara oo aysan ka badnaan in kala fogaan karta.

Carruurta dhigata xannaanada carruurta iyo dugsiyada hoose waxaa soo booqan kara kuwa ay isku kooxda joogtada ah yihiin [kohort].

Dhammaan waa in aan la aadin safarrada aan lagama maarmaanka ahayn.

Lama oranayo yaan la aadin cariish ku yaalla meel degmadaada ka baxsan. Laakiin is raaca keliya dadka aad isla deggan tihiin oo yaanan la idin soo booqannin. Adeegga aad u baahan tahay oo dhan intaadan bixin ka gado degmadaada. Ha tegin dukaammada, makhaayadaha ama meelaha ay dadka badan isugu yimaadaan ee degmada uu cariishku ku yaallo.

Masaafu fiican u jirso dadka kale ee shiiga ciyaaraya ama lugaynaya. Iska hubi talooyinka iyo xeerarka ka jira degmada uu cariishku ku yaallo, oo u hoggaansan kuwaas.

Meelaha shiiga lagu ciyaaro way furnaan karaan. Laakiin waa in ay hubiyaan in ay dadku mar kasta isu jirsan karaan masaafu 1 mitir ah. Waa in laga hortagaa in ay dadku hoosta iska galaan meelaha ay taasi badanaaba ka dhacdo sida safka wiishka shiiga, irridaha laga galo, soodhoweynta, musqulaha iyo makhaayadaha.

Waa in ay suurtaggal tahay in gacmaha layska nadiifin karo, waana in meesha marar badan si fiican loo nadiifiyaa. Si loo fududeeyo hawlaha raadraaca kala qaadista cudurka ee mas'uuliyiinta caafimaadka meelaha ay taasi suurtaggalka u tahay waa in ay sameeyaan nidaam lagu diiwaangelinayo dadka meesha jooga. Biibitooyinka iyo meelaha kale ee lagu nasto ee goobta uma furnaan karaan in cunto gudaha lagu cuno, laakiin daaqad ama meel la mid ah ayaa cuntada laga qaadan karaa – waana in cuntadaas bannaanka lagu cunaa.

Degmooyinka iyo gobolladu waa in ay gaadiidka dadweynaha ku soo rogaan tillaabooyin kuwii hore ka adag. Sida tusaale ahaan in boqolkiiba 50 keliya laga isticmaalo inta uu gaadiidku qaado.

Meheradaha qof-qof laysu hor fadhiisto sida timajaraha waa in ay soo rogaan tillaabooyin kuwii hore ka adag sida in ay gafuur-xir gashadaan mararka aysan suurtaggalka ahayn in

laysu jirsado masaafu hal mitir dhan ama shaqada la yareeyo ama si ku meelgaar ah loo joojiyo hawlaha u baahan in ay labada qof wejiyadoodu isu dhowaadaa.

Degmooyinka iyo dadweynaha degmooyinka ay arrintaan khuseyso waxaa lagula talinayaa in ay ka fikiraan in ay dadka baaraan maalmaha 7aad-10aad ee muddada uu qofku karantiilka ku jiro. Waxaa ayadana sidoo kale loo baahan yahay in laga fikiro in ay karantiil galaan dadka ay isla deggen yihiin dad u dhowaaday kuwo cudurka laga helay oo karantiil ku jira, haddii uu jiro shaki ah in ay dadkaasi qaadeen fayraska noociisa cusub.

Dadka khatarta weyn ugu jira in ay aad ugu xanuunsadaan ama u dhintaan haddii uu cudurku ku dhaco, waa in ay taxaddaraan.

Waajibka in gafuur-xir la isticmaalo

Waa in gafuur-xir la isticmaalaa marka aysan suurtaggal ahayn in ugu yaraan hal mitir laysu jirsado, haddii aysan ahayn qof aydnaan isla degganayn oo aad si kooban meel isugu dhaafaysaan.

Gafuur-xir ayaa la isticmaalayaa marka la joogo goobaha dadweynaha sida dukaammada, gaadiidka dadweynaha- iyo boosteejooyinka gudaha ah, makhaayadaha marka cunto laga qaadanayo, aagagga la wadaago ee suuqyada haddii ay u furan yihiin farmashiye iyo dukaan cunto oo ku dhex yaalla dartood – iyo goobaha cibaadada marka uu aas jiro.

Waajibka isticmaalka gafuur-xirku sidaa si la mid ah ayuu u qabanayaa shaqaalaha ka shaqeeya meel aysan suurtaggal ahayn in ugu yaraan hal mitir loo jirsado qofka kuu yimid. Laakiin taasi ma khusayso goobaha laga hirgeliyay tillaabooyinka kale ee looga hortagayo in cudurka la kala qaado sida in wejiga oo dhan la daboosho ama derbi idiin dhexeeyo iyo wax la mid ah.

Rakaabku waa in ay gafuur-xir isticmaalaan marka ay taksi raacayaan. Rakaabku wuxuu gafuur-xirka xiranayaa ka hor inta uusan taksiga gelin, iskamana furayo ilaa iyo inta taksigu ka istaagayo oo uu ka degayo. Waajibka isticmaalka gafuur-xirku si taas la mid ah ayuu darawalka taksiga u saaran yahay marka uu rakaab taksiga saaran yahay.

Carruurta ka yar 12 sano iyo dadka aan gafuur-xir isticmaali karin sababo caafimaad ama sababo kale awgood waajib kuma aha in ay gafuur-xir xirtaan

Degmo kasta waa soo rogi kartaa talooyin iyo xeerar adag oo ku salaysan xaaladda kala qaadista cudurka ee degmadaas. Waxaa sidaas darteed muhiim ah in uu qofku la socdo xeerarka degmadiisa ku yaalla.

Su'aalaha iyo jawaabaha cudurka ka dillaacay Bergen

Ma la joojiyay in ay baararku khamri iibin karaan?

Haa, degmooyinka wareegga 1-aad iyo kuwa wareegga 2-aad ba waa laga joojiyay iibinta khamriga ee baararka.

Goobaha jimicsiga miyaa la xirayaa?

Ha, goobaha jimicsiga ee dagmooyinka wareegga 1-aad iyo kuwa degmooyinka wareegga 2-aad ba waa la xirayaa.

Shaleemooyinka, tiyaatarrada iyo meelaha ruwaayadaha lagu dhigo ma la xirayaa?

Haa, waa in la xiraa goobahaan ku yaalla degmooyinka wareegga 1-aad iyo kuwa wareegga 2-aad.

Qabanqaabo ayaan leeyahay maalmaha foodda nagu soo haya. Qabanqaabada ma u wareegsan karaa degmo kale oo aysan ka jirin tillaabooyinkan adag?

Haddii qabanqaabada loogu tala galay dadweynaha degmooyinkan tillaabooyinka adag lagu soo rogay, markaas wareejintu waxay keeni doontaa in ay dadku meesha loo wareejiyay uga daba tagaan. Sidaas darteed waxaan dadka aad iyo aad ugu boorrinaynaa in aan qabanqaabooyinka degmo kale loo wareejinnin. Maxaa yeelay markaas waxaa dhici doona in ay dad badan meeshaas ka safraan oo uu cudurkiina sidaad ku faafo.

Degmooyinka uu cudurku ka jiro mid ka mid ah ayaan degganahay waxaana i soo booqanaya qoys degmo kale ka imaanaya. Ma i soo booqan karaan?

Haddii aad deggan tahay degmooyinka wareegga 1-aad, markaas waxaa lagugula talinayaa in aan guriga lagugu soo booqan, adiguna aadan degmooyin kale booqasho ku tegin. Waxaa taladaas laga leexanayaa marka la bixinayo adeegyada lagama maarmaanka ah ee qofka guriga lagu siinayo iyo booqashada qof sakaraad ah.

Dadka keligood deggan waxaa soo booqan kara ama ay booqan karaan hal ama labo saaxiib oo joogto ah ama hal guri oo joogto ah. Carruurta dhigata xannaanada carruurta iyo dugsiyada

hoose waxaa soo booqan kara kuwa ay isku kooxda joogtada ah yihiin. Waxaa loo baahan yahay in aan kulligeen iska dayno safarrada aan lagamamaarmaanka aadka ah ahayn.

Haddii aad deggan tahay degmooyinka wareegga 2-aad waxaa ku khuseeya talooyinka dalka ee ah in la xaddido xiriirka bulshada, in aad dadka bannaanka kula kulanto oo aysan ku soo booqan wax ka badan shan qof oo aysan ku jirin kuwa aad isla deggan tihiin. Carruurta dhigata xannaanada carruurta iyo dugsiyada hoose waxaa soo booqan kara kuwa ay isku kooxda joogtada ah yihiin.

Maxaa loola jeedaa yaan loo bixin safarrada aan lagamamaarmaanka aadka ah ahayn?

Safarka shaqada waa in loo arkaa mid lagama maarmaan ah, laakiin dadka intooda ay suurtagalka u tahay waxaa waajib ku ah in ay guriga ku shaqeeyaan haddii ay suurtagal tahay.

Carruurta laba meelood ku nool oo ay waalidka laba meel isku arkaan, weli ma u kala safri karaan waalidkood?

Inti uu jiray cudurkaan faafi og oo dhan qofka waa loo oggolaan in uu gurigiisa ku noolaado. Xeerka guud weli waa sidaas..

Dukaammada cuntada xayawaanku ma furnaan karaan?

Haa, meelaha lagu gado cuntada xayawaanka iyo qalabka kale ee lagama maarmaanka u ah xayawaanka rabbaayadda ah iyo xoolaha la dhaqdo waa furnaan karaan.

Dukaammada gada cuntada iyo badeecada maalin walba loo baahan yahay ma furnaan karaan?

Dukaammada cuntada waxaa soo hoos gelaya dabakaayooyinka, dukaammada gada waxyaalaha caafimaadka u roon iyo kuwa kale ee ay badeecadoodu cuntada u badan tahay. Dukaanku wuu furnaan karaa haddii badeecada uu gado ay cunto u badan tahay.

In kasta oo ay dukaammadu xiran yihiin, ma loo oggol yahay in ay joogaan shaqaale hawlo kale qabta?

Haa, dukaanku wuu xiran yahay marka uusan dadweynaha u furnayn. Shaqaaluhu dukaanka hawlo kale way ka qaban karaan, sida kala habaynta badeecada, shaqooyinka kale ee in la qabto loo baahan yahay iyo bixinta badeecada la soo dalbaday.

Cid kasta oo awoodda waxaa lagu amrayaa in ay guriga ku shaqayso. Waxaa shaqabixiyayaasha looga baahan yahay in ay shaqaalaha u suurageliyaan in ay guriga ku shaqeeyaan ilaa iyo inta ay taasi suurtaggalka tahay. Shaqabixiyayaashu waa in ay caddayn karaan in shaqaalaha loo sheegay sida arrintaas loo fulin karo.

Timajarayaasha iyo shaqooyinka kale ee adeegyada baxsha ma furnaan karaan? Mise waxaa loo arkaa sidii "dukaammo" ay tahay in ay xirnaadaan oo kale?

Timajarayaasha, jir-xannaaneeyayaasha, kuwa maqaarka sawirrada ku xardha iwm. dukaammo ma aha oo way furnaan karaan, laakiin waxaa lagula taliyay in ay kordhiyaan ka hortagga kala qaadista cudurrada sida tusaale ahaan in la isticmaalo gafuur-xir. Meheradaha caafimaadka ayaguna way furnaan karaan sida jir-duugaha, dukaammada muraayadaha indhaha iyo cilminafsiyaqaannada.

Dukaammada laga qaato badeeco horay looga sii dalabaday xalal sidee ah ayaa khuseeya?

Dukaammadu way u furnaan karaan in laga qaato badeeco horay looga sii dalabaday, marka ay qaadashadu u dhici karto si macquul ah oo laga hortagayo kala qaadista cudurka.

Ma lala kulmi karaa qof macmiille ah haddii horay ballan loogu dhigo sida tusaale ahaan marka uu qaadanayo gaari uu gatay?

Haa, dukaammadu way u furnaan karaan in laga qaato badeeco horay looga sii dalabaday oo lacagtoodi la sii baxshay marka uu jiro nidaam badeecada lagu qaadanayo halkaas oo si macquul ah looga hortagayo kala qaadista cudurka. Meelaha ay arrintani khuseyso ayay dukaammada gawaaridu ka mid yihiin.

Maxkamadaha degmooyinkan miyay xirnaanayaan?

Maya, maxkamaduhu qayb kama aha meelaha lagu soo rogay in la xiro.

Buuraha barafka lagu ciyaaro ma furnaan karaan?

Haa, kuma jiraan meheradaha iyo goobaha xirnaanaya. Sababtuna waxaa weeye in ay yar tahay khatarta loogu jiro in cudurka la faafiyo – laakiin waxaa shardi ah in la raaco qodobbada looga hortagayo kala qaadista cudurka ee meeshaas ka jira. Laakiin goobta shiiga lagu ciyaarayo waa in ay hubisaa in ay dadku mar kasta isu jirsan karaan masaafo 1 mitir ah. Waa in laga hortagaa in ay dadku hoosta iska galaan meelaha ay taasi badanaaba ka dhacdo sida safka wiishka shiiga, irridaha laga galo, soodhoweynta, musqulaha iyo makhaayadaha

iwm. Waa in ay suurtaggal tahay in gacmaha layska nadiifin karo, waana in meesha marar badan si fiican loo nadiifiyaa, gaar ahaan meelaha mar kasta la isticmaalo.

Ma lo oggol yahay ruwaayad, bandhig masraxeed, salaad iyo wixii la mid ah oo dhigitaal ah oo internetka toos loogala socdo ama tv-ga laga daawanayo?

Ujeeddada ka danbaysa in qabanqaabooyinka la mamnuuco waa in laga hortago isu imaatinka dad badan. Ruwaayad ama salaad aysan dad joogin ma soo hoosgelayaan qeexidda qabanqaabooyinka xeerhoosaadka § 13 ee covid-19, kaas oo ka hadlaya isu imaatin. Ka hortagtista kala qaadista cudurrada micno badan uma samaynayso in la mamnuuco ruwaayadaha, salaadaha iyo bandhig masraxeed dhigitaal ah.

Laakiin waxaa meesha soo gelaya waxyaalihii lagu taliyay ee ahaa in la xaddido tirada xiriirrada bulshada, waana in taas la tixgeliyaa marka la qabanayo ruwaayadda, salaadda ama bandhig masraxeedka.

Degmooyinka wareegga 1-aad waxaa la oggol yahay qabanqaabooyinka sida dhigitaalka ah u dhacaya haddii dadka jooga aysan ka badnayn shan qof oo aysan ku jirin shaqaalaha hawlwadeennada ka ah qabanqaabada. Degmooyinka wareegga 2-aad waxaa khuseeya xeerarka dalka ee ku saabsan qabanqaabooyinka.

Garaashyada gawaaridu ma furnaan karaan?

Haa, kuma jiraan meelaha waajibka looga dhigay in la xiro.

Meheradaha jumlada gada iyo kuwa qalabka dhismuhu ma furnaan karaan, si ay u suuragasho in badeecada laga saaro iyo si ay shirkadaha/farsamayaqaannadu badeecouga qaadan karaan?

Qaybta bakhaarrada iyo jumlada ee dukaammada qalabka dhismaha ee wax ka iibiya meheradaha farsamada gacanta iyo wixii la mid ah laguma soo rogin in la xiro oo way furnaan karaan.